

Xeer – Sharci 12 Feberaayo 1961, lamba. 1 Diw.

Unkidda billadda Xidigta Soomaaliya.

MADAXWEYNHA JAMHUURIYADDA

Markuu arkay Qod. 63aad, ee Dastuurka;

Markuu arkay Qod. 75aad, xarafka h, ee Dastuurka;

Markuu garwaaqsaday baahida iyo degdegta loo qabo in lagu dhaqaaqo unkidda Billadda (Maamuuska) Xidigta Soomaaliya;

Markuu dhegeytay Golaha Wasiirrada;

Asaga oo ku saleynaya soojeedinta Wasiirka Kowaad, iskuna af-garteen Wasiirka Arrimaha Dibedda iyo Wasiirka Gudaha;

WUXUU XEERAYAA

Qod. 1

Waxaa la jideeyey Maamuuska Billadda Xidigta Soomaaliya oolooqo talagay in shahaado gaar ah loogu siiyo abaamarin gaar oo ay ka muteysteen xagga Soomaaliya.

Qod. 2

Madaxa Nidaamka waxaa ah Madaxweynaha Jamhuuriyadda. Nidaamka waxaa haynaya Gole ka kooban hal xoghaye, 00 guddoominaya iyo lix xubnood. Xoghayaha iyo lixda xubnood waxaa lagu magacaabayaa Xeer uu soo saaro Madaxweynaha, kaddib soo/jeedinta Wasiirka Kowaad oo dhegeystay Golaha Wasiirrada.

Qod. 3

Nidaamka waxa uu ka kooban yahay shan qaybood;

- Derejada xushmo “Fardafuul”, ee Xidigta Weyn;
- Sarkaal Weyne;
- Derejada Hawl-karnimo ;
- Sarkaal Fardafuula;
- Derejada “Fardafuul”.

Shahaado sharafyo sarre waxaa Farda-fuullada , ee Xidigta Weyn, la guddoon-siin karaa maamuuska “Xarig Weyne”.

Qod. 4

Kaddib markuu arkay soojeedinta Wasiirka Kowaad, dhegeystay Golaha Wasiirrada iyo Guddoomiyaha golaha Nidaamka, Madaxweynaha Jamhuuriyadda waxa uu xeer kiisa ah ku goynayaa tirada ugu badan, ee shahaado Sharafyada oo la bixin karo sanadkii oo u kala soocon qaybaha kala duwan ee Nidaamka,

Qod. 5

Shahaado Sharafeedyada waxaa lagu bixinayaa xeer xeer uu soo -saaro Madaxweynaha Jamhuuriyadda, kaddib soojeedinta Wasiirka Kowaad ama (iskiis).

Xaaladda kowaad markuu dhegeysto Golaha Nidaamka.

Kuwa uu u bixinayo “iskiis” waa in ay ku saabsanaadaan abaalmarin khaas ah, mana ka badan

karaan labaatan marka loo dhigo hal tirada shahaado sharafyada loo gooyey sanadkiiba sida uu qabo Qod. hore.

Shahaado sharafyada lama siin karo xildhibaanno iyo la-taliyeyaal Dowladda Hoose, in lagu gudajiro muddada xil-hayntooda.

Qod. 6

Waa luminayaa shahaado-sharafeedda, qofka la guddoonsiiyey haddiiuu ka dhio mid uusan istaahilin.

Qod. 7

Xeerka Nidaamka waxaa lagu oggolaaday Xeer uu soo-saaro Madaxweynaha Jamhuuriyadda, kaddib soojeedinta Wasiirka Kowaad, ayada oo la dhegeystay Golaha Wasiirrada iyo Golaha Nidaamka.

Qod. 8

Xukuumadda waxa ay u idman tahay in ay soo saarto xeerarka looga baahan yahay xagga fulinta Xeerkan – Sharci,

Qod. 9

Xeerka/Sharci waxa uu dhaqangelayaa maalinta lagu nashriyo Faafinta Rasmiga, waxaana la hordhigayaa Golaha Shacbiga *Qaranka (sida uu qabo Qod. 63aad, ee Dastuurka, sii loogu rogo Sharci.

Muqdisho, 12^{ka} Febraayo 1961.

Aadan Cbdulle Cusmaan

Wasiirka Kowaad

Cabdirashiid Cali Sharmarke

Wasiirka Arrimaha Dibedda

Cabdullahi Ciise Maxamuud

Wasiirka Arrimaha Gudaha

Cabdirisaaq Xaaji Xuseen

Waa arkay waana Diiwaangeliyey

Diiw. lamba. 5, xaashi lamba. 31.

Muqdisho, 12^{ka} Febraayo 1961.

Hanti/dhowraha: **Axmed Dahir**